



Kotoutujan Digipolku

TILMAAMAHA DIGITALKA Diiwaanka dakhliga

Waa maxay diiwaanka dakhligu?

Diiwaanka dakhligu waa warbixin side elektarooni ah. Warbixin sidahaa waxaa lagu galaa aqoonsashada bangigaaga ama hubiyaha mobaylka. Diiwaanka dakhliga waxaa laga arki karaa mishahar intee le'eg ayaad qaadatey, kaalmooyinka bulshada ama howlgabka. Bixiyaha ayaa warbixintaa ku soo wargeliya diiwaanka dakhliga 5 maalmood gudahood marka la bixiyey.

Yaa isticmaali kara warbixinta diiwaanka dakhliga?

Warbixinaha diiwaanka dakhliga waxaa isticmaali kara in ka bada 400 hay'adood, tusaale ahaan Kelada, Maamulka cashuuraha, xafiiska dadka ajnabiga iyo qasnada shaqo la'aanta ayaa ka heli kara warbixintaada diiwaanka dakhliga. Diiwaanka dakhliga isticmaalkiisu wuxuu dedejiyaa oo uu fududeeyaa ka daneysiga ama la macaamilka.

Waxaad ka fiirsan kartaa warbixintaada diiwaanka dakhliga

Waxaad ka fiirin kartaa warbixintaada, tusaale ahaan:

- Mushaharkaaga
- Keladu kaalmooyinka ay kuu ogolaato
- Lacagta maalin laha ee qasnada shaqo la'aanta
- Howlgabka

Cadeynta diiwaanka dakhliga

Haddii aad dooneysid gunaanadka dakhligaaga, waxaad dalban kartaa cadeynta diiwaanka dakhliga oo PDF-qaabkiisu yahay. Waa lacag la'aan. Curinta diiwaanka dakhligu wuxuu qaataa meelaha 10 daqiiqo.

Halkan ka sii akhriso diiwaanka dakhliga oo luqad faseexa ah:

<https://www.vero.fi/tulorekisteri/tietoa-meist%C3%A4/tulorekisteri-selkokieli/>

Lähde: <https://www.vero.fi/tulorekisteri/>

